TRONDHEIM KOMMUNE

Waxbarashada iyo barbaarinta

# Laanta
# Adeegga qoyska iyo carruurta



# Laanta Adeegga qoyska iyo carruurta (BFT) ee degmada Trondheim

Adeegga qoyska iyo carruurtu waxay ka mid yihiin degmada aaggeeda waxqabad ee ”Waxbarashada iyo barbaarinta”, sida meelaha kale ee ay ka mid yihiin xannaanooyinka carruurta iyo iskoolada. BFT waxay u taagan tahay Adeegga qoyska iyo carruurta.

Waxqabadyadu waxay gebi ahaantood waafaqsan yahay sharciga norwiijiga waana inuu carruurta iyo dhallinyarada u sugo inay helaan fursado horumar kuwa ugu wanaagsan. Waalidka ayaa leh mas'uuliyadda ugu weyn ee rabbaynta carruurtooda. Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin waxbarasho ku sarjaran ilmahaas shuruudihiisa iyo baahidiisa. Iyagoo kaashanaya xannaanada carruurta iyo iskoolka ayay Adeegga qoyska iyo carruurtu waalidiinta caawinayaan, si ay carruurtu u hesho korriimo wanaagsan.



Qaar ka mid ah deeqaha muhimka ah ee ay Adeegga qoyska iyo carruurtu bixiyaan.

## Rugta caafimaadka carruurta/Adeegga caafimaadka iskoolada

Rugta caafimaadka carruurtu waxay qaabilsan tahay carruurta ilaa lix sano jira adeegga caafi-maadka iskoolkuna wuxuu qaabilsan yahay carruurta iyo dhallinyarada jirta lix ilaa 20 sano

Norwey waxay leedahay barnaamij talaal qaran, oo dhammaan carruurta waxaa lagu talaalaa rugta caafimaadka carruurta. Rugta caafimaadka carruurtu waxay kaloo la socdaan korriimada ilmaha waxayna waalidka ugu deeqaan taakulo iyo talooyin.

Dhammaan rugaha caafimaadka carruurta iyo iskooladaba waxaa jooga kalkaalisooyin sare oo caafimaad. Marmarka qaarkood waxaa kaloo goobjooge ah dhakhtar iyo xirfadlayaal kale. Carruurta iyo dhallinyarada ku dhibban hurdada, dhib ku qaba cuntada, cabsada, welwela ama qaba dhibaatooyin kale waxay caawi-mo iyo taakulo ka heli karaan rugta caafimaadka carruurta ama adeegga caafimaadka iskoolka.



## Laanta Adeegga waxbaris-barbaarinta iyo cilmi nafsiga (PPT)


Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada waa in loo sugo horumar kan ugu fiican ee suurtogal ah. Carruurta qaar ayaa u baahan waxoogaa la socod dheeraad ah. Haddii xannaanada carruurtu ama iskoolku ay u welwelaan ilmaha, waxaa ilmaha u gudbin karaan PPT. Waalidku waa inay taas oggolaadaan PPT waxay ku caawimaan inay ilmaha u diyaariyaan deeq waxbarsho-barbaarineed tan ugu wacan ee suurtogal ah iyadoo laga anbaqaadayo ilmaha shuruudihiisa iyo baahidiisa.

## Laanta Maadinta (dhawrista) carruurta

Maadinta carruurtu waa inay carruurta iyo dhallinyarada ku nool xaalad dhaawici karta caafimaadkooda iyo horumarkooda, u sugaan inay helaan daryeelka iyo caawimada ay u baahan yihiin. Daryeelka micnihiisu waa in la daryeelo baahida ilmaha sida kalgacalka, cuntada, dharka, hagaajintiisa iyo inaad awooddid inaad u samayn kartid xuduud cad.

Maadinta carruurtu waxay u baahanyhiiin inay waalidiinta la yeeshaan wadashaqayn qalbi furan oo wacan. Tani waxay muhim u tahay in la helo sida ugu wacan ee ay danta ilmuhu ku jirto. Maadinta carruurtu waxay had iyo jeer isku dayaan inay waalidka isla shaqeeyaan si xal fiican loogu helo ilmaha iyo qoyskaba.






Waalidku toos ayay maadinta carruurta ula soo xiriiri karaan haddii ay rabaan talo iyo hagitaan khuseeya rabbaynta carruurtooda.

Shaqaalaha xannaanada carruurta, iskoolka, xubnaha qoyska ama kuwo kale way la xiriiri karaan maadinta carruurta haddii ay ilmo u welwelaan. Kolka maadinta carruurtu ay helaan wargelin welwel ah oo khusaysa xaalad daryeel ilmood, waxay fuliyaan wadahadalo ay la yeeshaan ilmaha, waalidka, kalkaalisada caafimaadka ama shaqaalaha iskoolka iyo/ama xannaanada carruurta.

Iyagoo kaashanaya waalidka iyo ilmaha ayay maadinta carruurtu qiimeeyaan waxa habboon in la qabto mustaqbalka si ay wax u caawiyaan. Marmarka qaarkood waxaa la go'aamiyaa in qoysku aanu maadinta carruurta uga baahnayn caawimaad dheeraad ah. Kolkaa arrinta waa la laalaa.

Marmar dhif ah ayay dhacdaa in laga fursan waayo in ilmaha iyo waalidku ay waqti gaaban ama dheer kala degganaadaan. Maadinta carruurtu way rari karaan ilmaha haddii tusaale ahaan qoyska ay ka jirto isdagaalid weyn, xadgudub galmo ama isticmaalid maandooriye. Ujeeddada maadinta carruurtu mar walba waa inay meel ku hubsadaan caafimaadka iyo badbaadada ilmaha.

## Laanta Wax u qabdka qoys

Wax u qabadka qoys waxay noqon kartaa carruurta, dhallinyarada iyo waalidkooda/reerahooda oo loogu deeqo wadahadallo, talooyin iyo caawimo ha ahaato qofqof ama wadarnimo. Shaqaalaha laanta wax u qabadka qoys waxay wada shaqaynayaan waalidka oo caawimadanu waxay ku sarjaran tahay qooyskaas. Deeqdu waa ikhtiyaari, waalidkana way u furan tahay toos inay u soo xiriiraan ama ay usoo maraan rugta caafimaadka carruurta, xannaanada carruurta, iskoolka ama dhakhtarka joogtada ah.

Waalidiinta waxaa u furan inay ka qaybgalaan kooxda ICDP. ICDP waxay u taagan tahay International Child Development Programme. Adiga/idinku waxaad la kulmaysaa(n) kooxo waalidiin kale ah si aad isu weydaarsataan waayo aragnimada sida loola macaamilo carruurta. Hadafku waa inaad dareentaan waxa u wanaagsan carruurta, iyo in qofku uu noqdo hooyo ama aabbe kalsooni qaba. Kooxda wada hadalkoodu wuxuu ka salaysanyahay waayo aragnimada qof kastaa u leeyahay nolol maalmeedka, sida badan afka hooyo ayaa lagu qabtaa.



# Fayowsiin/Caafimaadka iyo daryeelidda

Degmada Trondheim waxaa yool u ah in carruurta iyo dhallinyarada kala dhiman iyo qoysaskoodu ay helaan adeegyo qumman oo la bedbeddeli karo oo tayo wanaagsan. Kala dhinnaantu waxay tusaale ahaan noqon kartaa dhibaatooyin xagga aragga ama maqalka, dhibaatooyin xagga dhaqdhaqaaqa ah, dhibaatooyin xagga hab dhaqanka ah ama caafimaadka dhimirka oo hooseeya kuwaas oo keenaya in ilmuhu u baahdo taakulo aanay u baahnayn carruurta kale ee ay isku da'da yihiin.

Waalidiintu waxay degmada ka codsan karaan adeeg, tusaale ahaan taakuleeye (støttekontakt)/qorshe xilliga firaaqada la yahay, ka nasin, mushahar xannaano ama kalkaaliso caafimaad oo guriga timaada. Iyagoo kaashanaya waalidiinta ayay Adeegga qoyska iyo carruurtu qiimaynayaan adeegyada ay ilmaha iyo waalidku xaqa u leeyihiin una baahanyihiin. Xaq u lahaanshuhu wuxuu waafaqsan yahay sharciga norwiijiga.



Degmada Trondheim
Waxbarashada iyo barbaarinta
Postboks 2300 Torgarden
7004 Trondheim

Mahad waxaa leh
Sedrik, Ylva, Ines, Kjerstin iyo Andreas; Alia, Ali, Ouday, Abir, Aadi, Latifa iyo Hussin
Sawir-qaade: Geir Hageskal iyo Carl-Erik Eriksson
www.trondheim.kommune.no/bft
2019
Unugga isku xiriirinta

